

2024-05-30

## **Macalinka Dugsiga hoose ee Indian Creek ayaa ku Guuleystay Wadooyinka Badqabka Metro Atlanta ee Sharafta leh ee Horyaalka Dugsiga ee Sannadka**

Macalinka Dugsiga hoose Indian Creek STEM Dhaqtar Adam Nykamp waa Horyaalka Sannadka ee Wadooyinka Badqabka Metro Atlanta (*SRTS*). Wadooyinka Badqabka Georgia ee Dugsiga ayaa ku siiyay abaalmarin xiliga Maajo 21 ardayda hortooda, macalinka, iyo shaqaalaha.

Wadooyinka Badqabka Atlanta ee abaalmarinta Horyaalka Sannadka waxaa la siiyaa shaqsi ku hogaamiyo wadooyin badqbab ah barnaamijka Dugsiga ee dugsigooda. Barnaamijkaan waa hindisaha Waaxda Gaadiidka Georgia oo ujeedadiisa tahay in lagu xoojiyo oo lagu dhiirogeliyo qoysaska inay u lugeeyaan oo aadaan ugana soo laabtaan dugsiga xaalado badqab ah.

*Ururka Gabdhaha Ladybug* ayaa u magacaabay Dhaqtar Nykamp abaalmarin abaalmarinta taageerada xamaasada leh ee barnaamijka Indian Creek ES. Ururkaan ku saleysan Clarkston ayaa ku xoojiyo gabdhaha dhInaca ciyaaraha, fayo qabka, iyo waxbarashada caafimaadka si ay uga caawiso gudaha iyo dibadaa. Magacaabistooda, ururka wuxuu u riyaaqay u heelanka Dhaqtar Nykamp ee badqabka ardayda iyo xiisahiisa lagu hubinayo fayo qabka canug walba, taasoo cadeyn u ah wax walboo uu sameeyo.

“Sannad walba, isagoon guuldareysan, wuxuu isku xiraa illaalada isgoysyada, taasoo si xamaasad leh ugu dhiirogeliso gudaha SRTS bulshada dugsiga, oo waxay u hogaamisaa ka qeybgelinta aqoon isweedaarsiga waxbarashada badqabka wadada oo ay la jiraan waalidiinta iyo ardayda,” ururka ayaa yiri.

“Balanqaadkiisa ee sare loogu kacayo oo dhaafsan doorkiisa baraha STEM waa mid dhiirogelin iyo soo jiidasho leh. Daryeelka dhabta ah ee Adam ee loogu tallogalay badqabka ardayga ee tallaabo walba oo uu ka qaado ka qeybgalka madadaalada oo ay wehliso macalinka sida dulqaadka leh u barayo carruurta K-5 sida loogu qorsheeyo wadooyinka si masuul ah. Wuxuu qeexaa waxa ay ka dhigantahay in la ahaado u doode dhab ah oo wadooyin badqab ah ee ku aadan dugsiga.”

Xiriiriya Gobolka Metro Atlanta Marielena Gutiérrez ayaa sheegtay in Dhaqtar Nykamp uu runtii u qalmo abaalmarin.

“Aad ayaaan ugu faanaa u heelankiisa sida Horyaalka Dugsiga,” ayay tiri. “Way adagtahay in laga xusho 155 dugsiyo gobolada DeKalb, Clayton, Fulton, iyo Rockdale. Wuxuu u qalmaa iyada iyo wax badan.”

XXX